Siyaasadda Taleefanka Gacanta Degmada: Soo Koobidda Fulinta Kaqeybgalka

Horudhaca iyo Sooyaalka

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) waxay dejinayaan siyaasad degmada oo dhan ah oo ku aadan taleefanka gacanta iyo elektaroonigga gaarka ah, oo ka dhashay shuruudaha sharci-dejinta gobolka Minnesota. Waqti xaadirkan, SPPS ma lahan siyaasad degmada oo dhan ah, oo xeerarka iyo filashooyinka taleefanka gacanta waxaa go'aamiya dugsi kasta.

Si loo wargeliyo horumarinta siyaasadda degmada oo dhan, SPPS waxay kaqeybgeliyeen ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha si ay si fiican ugu fahmaan dookhyadooda, aragtidooda iyo walaacyadooda ku saabsan isticmaalka iyo siyaasadda taleefanka gacanta iyo elektaroonigga gaarka ah ee dugsiyada dhexdooda. Ra'yi ururino ayaa loo diray dhammaan qoysaska SPPS, iyo ardayda fasalka 6-12aad iyo shaqaalaha. Intaa waxaa dheer, doodo ayaa lala yeeshay siddeed Guddiyo La-talin Waalid (PAC-yo), waxaana lala fadhiistay ardayda dugsiga sare iyo labo Senatar oo ka tirsan Gobolka Minnesota.

Soo koobidan fulineed waxay bixinaysaa dulmar heersare ah oo ku saabsan Warbixinta Kaqeybgalka Qorshaynta Siyaasadda Taleefanada. Warbixinta buuxda waxaa la heli karaa marki la codsado.

Dhaqamada Dugsi ee Hadda Jira

Ma jiraan dugsiyo hoose oo SPPS ah oo oggol isticmaalka taleefanka gacanta inta lagu jiro maalinta dugsiga. Dugsiyada dhexe sidoo kale guud ahaan ma oggola taleefannada gacanta inta lagu jiro maalinta dugsiga oo dhan (xakameyn buuxda). Dugsiyada sare waxay u muuqdaan inay leeyihiin xoogaa xaddidaado ah, kuwaasoo isticmaalka taleefanka gacanta ka mamnuucaya fasalka dhexdiisa, balse oggolaanaya xilliga qadada ama kala wareegga. Liis dhammeystiran oo ku saabsan tilmaamaha iyo xaddidaadaha taleefanka gacanta ee heer dugsi ee hadda waxaa lagu diiwaangeliyay halkan.

	Ma Lahan Xakamayn	Xoogaa Xakamayn Ah	Xakamayn Buuxda
Dugsiyada Hoose	5*		35
Dugsiyada Dhexe	1 (SPPS Online)	2	13
Dugsiyada Sare	1 (SPPS Online)	11	2

Goobo Gaar ah	2*		2

**Dugsiyadani ma lahan tilmaamo qoran balse guud ahaan waxay sheegaan in taleefannada gacanta aan la oggolayn, waxayna wadahadal 1-1 ah la yeeshaan qoysaska marki loo baahdo.*

Tirada Jawaabta Ra'yi Ururinta iyo Qiimeynta

Ra'yi ururinada onlaynka ah ayaa qeyb weyn ka ahaa hawlaha kaqeybgalka, iyagoo gaaraya in ka badan 10,000 oo shakhsi. Qiimeynta jawaabta waxay waxyar ka sarreeyeen 20%, oo uga qeybgalka luuqado aan ahayn Ingiriisiga waa ay ka badnayd ra'yi ururinada kale ee SPPS ee dhawaan la qabtay.

Kooxda	Tirada Ka Jawaabayaasha	Qiimeynta Jawaabta
Ardayda	3,974	21%
Shaqaalaha	662	22%
Qoysaska	5,870	20%
Wadarta	10,514	22%

Aragtida Ardayda

Ardayda dugsiga dhexe iyo kuwa dugsiga sare labadaba waxay muujiyeen doorasho xooggan oo ku aadan siyaasado xakamayn yar leh. Waxay bidhaamiyeen u adeegsiga taleefannada gacanta ee ujeedooyinka tacliinta, xiriirka qoyska, dhageysiga muusigga, iyo nasashada caafimaadka ee maskaxda. Ardayda waxay sidoo kale guud ahaan sheegeen in taleefannada gacanta aanay wax badan ka mashquulin ama carqaladayn waxbarashadooda.

Si kastaba ha noqotee, isticmaalka taleefanka ee ardaydu iska sheegeen inta lagu jiro dugsiga ayaa soo jeedinaysa saameyn weyn. Ardaydu waxay si aad ah uga warbixiyeen isticmaalka taleefoonadooda gacanta inta lagu jiro saacadaha dugsiga. Tan ugu xiisaha badan, 12% waxay sheegeen in ay taleefanadooda ay iskuulka ku isticmaalaan in ka badan saacad iyo bar maalinti, halka 7.5% ay sheegeen in ay taleefanadooda ay iskuulka ku isticmaalaan in ka badan labo saacadood. Natiijooyinkani waxay khuseeyaan waaqaca cilmi baarista jirta ee ku saabsan saameynada isticmaalka taleefanka gacanta ee waxbarashada ardayda iyo waxqabadka tacliinta.

Aragtida Shaqaalaha

Marka loo barbardhigo ardayda, shaqaalaha dugsiga ku salaysan waxay bixinayaan sawir ka duwan. Dugsiga dhexe iyo sare, macalimiinta waxay sheegeen carqalado joogta ah oo ay keentay isticmaalka taleefanka gacanta. Boqolkiiba lixdan iyo saddex ka mid ah shaqaalaha waxay tilmaameen in carqaladaha la xiriira taleefanka gacanta (ee daran ee ay tahay inay farageliyaan) ay dhacaan ugu yaraan halmar xiisad kasta, halka 39% ay sheegeen saddex jeer ama ka badan xiisadiiba.

Shaqaalaha dugsiga sare waxay si weyn ula kulmaan carqalado fasal oo badan marka loo barbardhigo dhiggooda dugsiga dhexe, oo ay u badan tahay in ugu yaraan qayb ahaan ay sabab u tahay sharciyada iyo filashooyinka xakamaynta yar leh. Intaa waxaa dheer, dugsiyada dhexe ee leh sharciyada iyo filashooyinka xakamaynta yar waxay la kulmaan caqabado aad uga badan.



Macalimiinta waxay sidoo kale tilmaameen culayska shucuureed ee ka jira dhaqangelinta siyaasadaha aan iswaafaqsanayn iyo la tacaalidda loolanka awoodeed ee soo noqnoqda ee ardayda ee ku aadan isticmaalka taleefanka. Ugu dambaynti, shaqaaluhu waxay si joogta ah uga wada hadleen baahida loo qabo hirgelinta siyaasad dheeraad ah iyo taageero anshaxeed si culayska aanu u saarnayn macallimiinta oo keliya.

Aragtiyada Waalidka/Qoyska

Waalidiinta meel dhexe ayay ka galaan dooda. Iyadoo waalidiin badan ay garowsan yihiin awoodda carqaladda taleefannada gacanta ee fasallada dhexdooda, waxay sidoo kale xooga saaraan muhiimada ay leedahay joogtaynta khadad furan oo ah wada-xiriir lala yeesho ubadkooda, gaar ahaan xaaladaha degdegga. Xulashooyinka waalidka ayaa ku kala duwan heerka fasalka, iyagoo si weyn u taageeray in siyaasadaha loo adkeeyo dugsiyada dhexe iyo in siyaasadaha aad loogu dabciyo dugsiyada sare. Si kastaba ha noqotee, guud ahaan heerarka oo dhan, waalidiintu waxay rabaan caddaymo iyo joogtayn xagga siyaasadaha ah.

Sinnaan

Shaqaalaha iyo waalidiinta labadaba waxay dalbanayaan baahida loo qabo sinnaanta siyaasad kasta oo degmada oo dhan ah. Siyaasadda iyo qorshaha hirgelinta waa in ay si cad u tixgeliyaan ardayda leh barnaamijyada IEP, iyo kuwa ubaahan hoy'siinada caafimaad. Intaa waxaa dheer, tallaabooyinka edbineed waa in ay ka fogaadaan in ay ooga sii daraan sinnaan la'aanta jirta iyagoo si aan loo meel dayin u saameynaya ardayda qaar ama horseedaya ardayda in laga saaro

waxbarashada. Ugu dambeyntii, jawaabaha laga bixinayo ku xadgudubyada siyaasadda waa in ay heer-heer yihiin oo aanay culays aan loo baahnayn saarin macalimiinta ama waalidiinta.

Talo Soo Jeedin

Horumarinta siyaasad taleefanka gacanta oo degmada oo dhan ah waa in ay isu dheelli-tirtaa baahiyaha iyo aragtiyada kala duwan ee ardayda, shaqaalaha iyo waalidiinta iyadoo isla markaana mudnaanta la siinayo sinnaanta, caddaynta, iyo taageerada hirgelinta/ dhaqangelinta. Talooyinka gaarka ah ee soo socda waa in la tixgeliyaa inta siyaasadda la horumarinayo lana hirgelinayo:

- **Tixgelinta ururinta xog tayo badan leh:** Tani waxaa ku jiri kara qabashada kooxaha diiradda ee shaqaalaha iyo/ama waalidiinta iyo la xiriirista kooxaha gorgortanka shaqaalaha ee ay sida ba'an u saameynayaan isbeddelada la soo jeediyay.
- **Meelmarinta siyaasad iswaafaqsan, si cad loo shaaciyay oo degmada oo dhan ah:** Dhammaan saamileyda waxay rabaan caddaynta iyo iswaafaqsanaanta siyaasadda iyo hirgelinta.
- **"Ganbaleel-ilaa-ganbaleel" ama "xakamayn buuxda" oo ah ugu yaraan dugsiyada hoose ama dugsiyada dhexe:** Natiijooyinka dugsiyada dhexe waxay si xoogan u taageerayaan xakamayn buuxda oo lagu soo rogo dugsiyada hoose iyo dugsiyada dhexe. Natiijooyinka dugsiyada sare waa kuwo aad isugu qasan; saamilayda waxay aad u danaynayaan in ay ardayda adeegsadaan, balse taleefannada gacanta waxay hadda mashquulin iyo carqalad weyn oo la xusi karo ka geystaan dugsiyada sare marka loo barbardhigo dugsiyada dhexe (oo ay u badan tahay in ay ugu wacan tahay siyaasadaha xakamaynta yar leh).
- **Ka taageerista macalimiinta ee hirgelinta iyo dhaqangelinta:** Tani waxay ahayd farriinta koowaad ee ka socotay shaqaalaha, kuwaas oo sheegay in aysan hadda haysan taageerada ay u baahan yihiin si ay wax uga qabtaan taleefannada gacanta ee fasalka dhexdiisa. La'aanta kheyraad iyo taageero waxay horseedaa dhaqangelin aan joogta ahayn, luminta waqtiga waxbarashada, iyo hoos u dhaca cilaaqaadka macalinka iyo ardayga.
- **Wax ka qabashada wada-xiriirka waalidka:** Siyaasaduhu waa in ay ku xisaabtamaan rabitaanka waalidiinta iyo baahida ay u qabaan in ay la xiriiraan ubadkooda xaaladaha caadiga ah iyo xaaladaha degdegga ah.
- **Naqshadeyn iyo hirgelin loo siman yahay:** Siyaasaduhu waa in ay wax ka qabtaan qorshayaasha IEP/504, ka hortagaan in waxbarashada laga saaro, ka hortagaan in culays aan loo baahnayn la saaro waalidiinta, iyo xaqiijinta in ardayda oo dhan loola dhaqmo si caddaalad ah.
- **Diirad saarka tacliinta dhijitaalka:** Dugsiyadu waa in ay masuuliyadda dhijitaalka ah iyo waxbarashada is-xakamaynta ah ku daraan manhajkooda.
- **Qiimeyn joogta ah:** Degmadu waa in ay dejisaa habab lagu qiimeeyo saameynta siyaasadda oo ay ku samayso wax ka beddello hadba sidi loogu baahdo.

Tallaabooyinka Xiga

Natiijooyinkaan waxaa Guddiga Waxbarashada la horgeeyay Diseembar 19, 2024, oo ay wehliso qabyo qoraalka siyaasadda lagu taliyey. Bandhigga buuxa ee siyaasadda qabyada ah waxaa laga heli karaa BoardBook laga bilaabo bogga 123. Dood dheeraad ah oo ku saabsan

siyaasadda ayaa ka dhacday shirkii Guddiga Guddida ee la qabtay Janaayo 7, 2025. Halkan ka dhageyso cod laga duubay dooda.

Siyaasadda wuxuu markale Guddiga uga wada hadli doonaa labada kulan ee soo socda ee joogtada ah ee la qabanayo Janaayo 21 iyo Febraayo 18, iyadoo la filayo in cod loo qaado kulanka Febraayo 18. Xubnaha dadweynaha ee raba in ay faallo ka bixiyaan siyaasadda waxaa lagu casuumayaa in ay iska diiwaangeliyaan faallo bixinta dadweynaha. Marki siyaasadda uu Guddiga ansixiyo, dugsiyada waxay isu diyaarin doonaan inay hirgeliyaan bilowga sanad dugsiyeedka 2025-26 ee bisha Sibteembar.